# Heshiisiinta maxkamadda

## Waxaay ku habboontahay muranada yar iyo kuwa waynba. Waxaa lagu doorsan karaa fadhiga maxkamadeedd.

Heshiisiintu waa doorasho lagu baddalan karo fadhiga maxkamadda dabacsan oo ikhtiyaari ah oo lagu xallin karo arrimaha muranada. Heshiisiinta waxaa sidoo kale toos loogu codsan karaa foomka heshiisiinta. Labada dhinac ee kiiska ayaa wadahadlaya oo si heshiis uu ku jiro uga wada tashanaya xalka iyadoo uu dhexdhexaadinayo heshiisiiye dhexdhexaad ah. Heshiisiinta waxaa badanaa lagu helaa xal ay dhinacyada kiiska oo dhan ku qanci karaan. Heshiisiintu waxaay sidoo kale khuseyn kartaa wax ka duwan codsiyada ay dhinacyada kiisku ugu horreyn sameeyeen. Heshiisiiyuhu waa qaadi ku tukhasusay heshiisiinta.



Tuomioistuinlaitos
Domstolsväsendet
Finnish judiciary

# Dhexdhexaadis mise maxkamad?

## Muran

| Heshiisiin maxkamadeed | Fahdi maxkamadeed |
|---|---|
| Xal wadajir ah / isfahan | Iska hor imaansho |
| Waxaa xooga la saarayaa baahiyaha labada dhan | Waxaay ku sal leedahay xeerarka iyo sharciyada |
| Labada dhan ayaa dhexdooda heshiinaya | Qaadiga ayaa xukunka gaadhaya |
| Waa nidaam jaban oo degdeg ah | Badanaa waa qaali waana mid wakhti dheer qaata |
| Labada dhinac waxaay mas'uul ka yihiin kharashkooda oo kaliya | Waxaa macquul ah in qofka laga guuleystay uu kharashaadka ka mas'uul noqdo |
| Waxaa la hiigsanayaa in muranku uu joogsado | Xukunka marka la gaadho muranku mid sii jira ayuu noqon kara |
| Haddii heshiis la gaadhi waayo kiiska fadhi maxkmadeed ayaa lagu sii wadi karaa | Kiiska fadhiga maxkamadda yaalla heshiisiinta ayaa loo wareejin karaa |

